

# COVID-19

## wargelinta dagganeyaasha



**Maarso 16, 2020**

Guryaha Bulshada Toronto (Toronto Community Housing) waxay si sokke ula shaqeysaa Caafimaadka Dadweynaha Toronto (Toronto Public Health) iyo Magaalada Toronto si ay ula socoto saamaynta COVID-19 ku leedahay dagganeyaasha.

### **Calaamadaha COVID-19**

Calaamadaha COVID-19 waxaa ka mid ah qandho, qufac, xanuunka murqaha iyo daal, iyo dhibaato lagala kulmo neefsiga. Waxaa kaloo la soo sheegay dhuun xanuun, madax xanuun iyo shuban.

### **Waxa la sameeyo haddii aad isku aragtid calaamado**

Haddii aad ku xanuunsatid calaamadaha COVID-19, waa in aad naftaada go'odoomisid. Joog guriga iskana ilaali in aad ku dhawaatid dadka kale, kana mid ah kuwa kula jooga gurigaada. La xariir Telehealth Ontario, telefoonka **1-866-797-0000**, iyo xafiiska bixiyahaada daryeelka aasaasiga.

### **Wararka caafimaadka dadweynaha la siiyo qofka natiisa go'doomiyo**

Caafimaadka Dadweynaha Toronto (Toronto Public Health) waxay kula tallisaa qof kasta oo ka soo noqda safar dibadda ka ah Canada laga bilaabo Maarso 2, 2020 in uu naftiisa go'doomiyo muddo 14 maalin.

### **Soo sheegidda qofka naftiisa go'doomiya**

Haddii aad naftaada go'doomisid, fadlan ogeysii xarunta Daryeelka Macaamilka (Client Care Centre), telefoonka **416-981-5500** ama [help@torontohousing.ca](mailto:help@torontohousing.ca). Tan waxay noo ogolaan doontaa in aan qaadno tallaabadaha ku habboon ammaanka iyo in aan kugu xerno meelaha laga helo taageero.

### **Taageerada la siiyo dagganeyaasha**

Haddii aad u baahan tahay in lagaa kaalmeeyo hawlaha la xariiro nolol maalmeedka taasoo ka dhallata talaabadaha lagu xaddido faafidda COVID-19, aan ogaano adiga oo naga soo waca telefoonka **416-981-5500** ama [help@torontohousing.ca](mailto:help@torontohousing.ca).

### **Nadaafadda iyo jeermiga laga dillo dhismooyinkena**

Waxaan ku hawlanahay xoojinta nadaafadda iyo dillidda jeermiga ku jira dhamaan dhismooyinkena, anagoo ahamiyad dheeraad ah saarno meelaha aad loo taabto ee ka dhexeeyo dadka.

### **Si aad u heshid macluumaad badan**

Bogga internetka Caafimaadka Dadweynaha Toronto (Toronto Public Health) [toronto.ca/coronavirus](https://toronto.ca/coronavirus) waxaa la casriyeyaa maalin kasta. Waxaad kaloo wici kartaa telefoonka **416-338-7600** haddii aad qabtid su'aalo.



Wac **416-981-5500** si ogeysiis kaan laguugu siiyo luqad kale ama qaab kale.